Feb. 16, 2017

Qoysaska DPS ee Qaaliga ah:

Bulshadeena kala duwan oo in ka badan 90,000, waxaan aqoonsanay arday badan iyo qoyskooda inay ku dadaaleen su'aalahooda gaarka ah, wacalayada iyo cabisda ku saabsan muuqaalka qaranka ee la xiriirio muhaajirka. Howlgalkeena adag – iyo waajibaadyadeena sida waafaqsan sharciga – waa hubinta ah inay dugsiyadeena ku yaalan meelo ammni ah halkaaso jinsiyada ardayga, qowmiyada, iyo diinta xaaldda soo galootiga aysan ku abuurin wax caqabad ah waxbarashada canuga. Si loo caawiyo howlgalkaan, waxaan rabnay inaan kula wadaagno jawaabaha ku aadan su'aalaha soo socda ee la xiriiro heerka socdaalka iyo ballan qaadkeena si looga difaaco ardayda midab takoorka iyo dhibaateynta.

Su'aalahaada Jawaabtooda:

S: Waxaa maxay saamaynta ay ku leedahay xaaladda socdaalka waxbarashada canugeyga?

J: Waxba. Carruurta waxay leeyihiin xuquuqda dastuuriga ah inay helaan waxbarasho siman iyada oo aan laga eegin xaaladda socdaalka ama xaaladda waalidkooda. Xuquuqdaas ka ma qaadi karo madaxweynaha ama gobolka ama sharci dejiyaalka federaalka.

S: Miyay weydiiyaan Denver Public Schools heerka socdaalka carruurta ama goortii isaga/iyada iska diiwaangeliyo?

J: Maya. Dugsiyada bulshada degmada sida DPS waxaa ku waajib ah inay diiwaangeliso ardayda iyada oo aan laga eegin heerkooda socdaalka iyo iyada oo aan takoor jirin oo ku saleysan jinsiyada, midabka ama asalka dhalashada.

S: Dugsiga degmada miyuu marnaba la wadaagaa heerka socdaalka ardaydeena iyo saraakiisha socdaalka faderaalka?

J: Sida kor lagu sheegay, ma weydiino ardayda heerka socdaalka marka ay is diiwaangelinayaan. Si kastaba ahaate, haddii aan ogaano in ardayda uusan laheyn heerka socdaalka, lama wadaageyno warbixintaas Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS). Haddii aan helno codsi warbixinta ardayga ah, xafiiska sharciga DPS wuxuu u dagaalamayaa si uu u illaaliyo dhammaan ardaydeena' xaquuqda dastuurka iyo sharciga si loogu haayo warbixintooda si gaar ah.

S: Miyaan ognahay haddii ay jireyso wax tallaabooyin fullinta socdaalka ah ee sababaha dugsiga?

J: Ka bilow maanta, waxaan aaminsannahay in dowlada faderaalka ay weli raaceyso tilmaanta ee loogu talo galay dugsiyada sida goobaha xasaasiga ah halka tallaabooyinka fullinta sharciga ay xasaasi tahay waa inaysan dhicin.

S: Haddii aan ahay waalidka ama masuulka waxaan ka walaacsannahay wax ku saabsan in la ixiro iyada oo canugeyga dugsiga ku maqanyahay, maxaan sameeyaa?

J: Dhacdada in waalid walba la xiro inta lagu jiro saacadaha dugsiga, degmada ayaa ka qeybgaleyso dhibaatooyinkeena iyo kooxyada jawaabta degdega si ay u taageerto ardaydeena. Fadlan qaado fursadaan si loo cusbooneysiiyo warbixinta xiriirkaaga degdega ee ardaygaada midkood dugsigaaga ama Qeyb Gaar ah.

S: Ka waran haddii aan ahay helaha DACA?

J: Tallaabada dib u dhigida Imaanshaha Carruurnimada (DACA) waxay ku saleysantahay amarka madaxweynaha. Madaxweynaha cusub wuxuu dooran karaa inuu dib loo dhigo amarkaas. Haddii aad tahay helaha DACA, tixgeli gaarista qareenka socdaalka hadeer si markaas loo go'aansado haddii aad heli kartid qaab wanaagsan ee heerka socdaalka. Warbixin dheeraad ah waxaa laga heli karaa halkaan.

S: Maxaan sameeynaya haddii aan rabo inaan fahmo xuquuqaheyga socdaalka?

J: Kaliya qareenada socdaalka ayaa ku siin kara tallo sax ah ee ku saabsan heerka socdaalka iyo sida aad u dabagali kartid xaquuqda sharci walba ee laga yaabo inaad leedahay. Difaacaada gaarka ah, fadlan ha u raadin tallada notarios ama kuwa kale ee aanan aheyn qareenada socdaalka aanan sharciyeysneyn. Liiska illaha la heli karo waxaa laga heli karaa halkaan. Sidoo kale, waxaad ka raadin kartaa qareen socdaal Hay'ada Qareenada Socdaalka Mareykanka halkaan (Ingiriis) ama halkaan (Isbaanish).

S: Maxay sameysaa Denver Public Schools si ay u hubiso in wax arday ah ama qoys aanan lagu takoorin ama aanan la dhibaateynin sababtoo ah jinsiyadooda, qomwiyada, diinta, ama asalka dhalashada?

J: DPS waxay si qoto dheer u aaminsan tahay hubinta sinnaanta – waa mid ka mid ah qiyamyadeena aasaaska ah. Waxaan leenahay xeerar diyaarsan ee dhigaya inaan la takoorin ama la dhibaateynin ardaydeena, qoysaska ama shaqaalaha iyada oo lagu saleynayo jinsiyada, qowmiyada, diinta, asalka dhalashada iyo heerarka kale oo diyaarsan.

S: Maxaan sameeyaa haddii aan dareemo sida ardaygeyga ama miyaan noqday dhibanaha takoorida ama dhibaateynta?

J: Fadlan ku soo wargeli dabeecada isla markaasba hogaanka dugsiga ama kormeeraha guud. Cabashooyinka iyo walaacyada waxaa lagu gudbin karaa adiga oo isticmaalayo foomamka iyo nidaamyada Xeerka Guddiga AC (riix halkaan). Waxaan u qaadanaa cabashooyinkaan si dhab ah si aan u hubino in dugsiyadeena ay sii joogteeyaan inay ahaadaan boosas banaan.

Haddii aad qabtid su'aalo aanan lagaga jawaabin halkaan, fadlan soo wac communications@dpsk12.org. Waxaan kuwada shaqeyneynaa si aan u siino jawaabo oo waxaan joogteyneynaa inaan ku cusbooneysiino waraaqdaan jawaabo su'aalahaaga ku aadan.